Wellcare
Ogeysiiska Habdhaqamada Asturnaanta

OGEYSIISKANI WUXUU SHARAXAYAA SIDA MACLUUMAADKA CAAFIMAAD EE ADIGA KUGU SAABSAN LOO ISTICMAALI KARO LOONA SHAACIN KARO IYO SIDA AAD KU HELI KARTO MACLUUMAADKAN.
***FADLAN SI FIICAN DIB UGU EEG*.**

Dhaqangalka waa 1/1/2027

Si aad u hesho caawimo tarjumaad ama lagaa caawiyo fahamka kani, fadlan wac **1-888-550-5252 (TTY): 711).**

Si necesita ayuda para traducir o entender este texto, por favor llame al telefono. **1-888-550-5252 (TTY: 711)**.

Waajibaadyada Hay'adda Caynsan:

Wellcare waa Hay'ad Caynsan marka la eego qeexitaanka iyo sharciyeynta Sharciga Qaadida Caymiska Caafimaadka iyo Isla Xisaabtanka ee 1996 (HIPAA). Wellcare waxaa sharciyan looga baahan yahay inay ilaaliyaan asturnaanta macluumaadkaaga caafimaad ee dhowrsan (PHI), inay ku siiyaan Ogeysiiskan waajibaadyadayaga sharci iyo habdhaqamada asturnaanta ee la xiriira PHI-gaaga, inay u hogaansamaan shuruudaha Ogeysiiska haddeer lagu dhaqmo, iyo inay ku soo ogeysiiyaan haddii ay dhacdo in lagu xadgudbo PHI-gaaga aan sugneyn.

Ogeysiiskani wuxuu sharaxayaa sida aan u isticmaali karno oo aan u shaacin karno PHI-gaaga. Wuxuu sidoo kale sharaxayaa xuquuqahaaga ku aadan helitaanka, wax ka beddelida, iyo maareynta PHI-gaaga iyo sida aad u isticmaali karto xuquuqahaas. Dhammaan isticmaalka iyo bandhigyada kale ee PHI-gaaga ee aan lagu sharaxin Ogeysiiskan ayaa la samayn doonaa keliya haddii lagaa helo ogolaansho qoraal ah.

Wellcare ayaa xaq u leh inay beddesho Ogeysiiskan. Waxaan xaq u leenahay inaan Ogeysiiska lagu sameeyay dib u-eegista ama la beddelay u dhaqangelino/adeegsano PHI-gaaga aan horey u hayno iyo sidoo kale wixii PHI-gaaga ah ee aan heli doono mustaqbalka. Wellcare ayaa isla markiiba dib u eegi doonta oo qaybin doonta Ogeysiiskan mar kasta oo beddel lagu sameeyo waxyaabaha soo socda:

- Isticmaalka ama Shaacinta.
- Xuquuqahaaga.
- Waajibaadyadayaga sharci.
- Habdhaqamada kale ee asturnaanta ee lagu sheegay ogeysiiska.

Waxaanu Ogeysiis kasta oo dib u-eegis lagu sameeyay soo dhigi doonaa mareegtayada ama waxaan si gaar ah ugu soo diri doonaa boostada.

Ilaalinada Laga Adeegsado Gudaha Hay'ada ee PHI-ga Af-kahadalka ah, midka Qoraalka ah iyo midka Elektirooniga ah:

Wellcare waxay ilaalisaa PHI-gaaga. Waxaa sidoo kale naga go'aan inaanu qarsoodi ka dhigno macluumaadkaaga isirka, qoomiyada, iyo luqadaada (REL), iyo aqoonsiga qaabka galmada iyo jinsiga (SOGI). Waxaan leenahay nidaamyo loogu talagalay asturnaanta iyo ammaanka oo na caawinayo.

Kuwani ayaa ah qaar ka mid ah siyaabaha aan u ilaalino PHI-gaaga:

- Waxaan ku tababarnaa shaqaalahayaga inay raacaan nidaamyadayaga asturnaanta iyo amniga.
- Waxaan uga baahanahay shurakadayada ganacsi inay raacaan nidaamyada asturnaanta iyo amniga.
- Waxaan ilaalinaa ammaanka xafiisyadayada.
- Waxaan uga hadalnaa PHI-gaaga kaliya sababo ganacsi waxaana kala hadalnaa keliya dadka u baahan inay ogaadaan.
- Waxaanu ilaalinaa PHI-gaaga marka aanu ku direyno ama ku kaydinayno qaab elektaroonig ah.
- Waxaanu isticmaalnaa tignoolajiyad si aan dadka aan loo ogoleyn uga ilaalino inay helaan PHI-gaaga.

Isticmaalka iyo Shaacinta PHI-gaaga ee la Ogolyahay:

Waxani soo socda waa liiska sida aan u isticmaali karno ama u shaacin karno PHI-gaaga iyadoon lagaa helin ogolaansho ama fasax:

- ***Daaweyn*** — Waxaa laga yaabaa inaan PHI-gaaga siino dhakhtar ama daryeel caafimaad bixiye kaloo ku daawaynayo ama aan u isticmaalno isku-duwida daawayntaada ay bixinayaan daryeel bixiyeyaasha kala duwan, ama inay naga caawiso qaadashada go'aamada oggolaanshaha hordhaca ah ee la xidhiidha dheefahaaga.

- ***Lacag-bixin*** — Waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno oo aan siino PHI-gaaga si aan u bixinno lacagaha dheefaha ee adeegyada daryeelka caafimaad ee lagu siiyay. Waxaa laga yaabaa inaan ujeeddooyin lacag-bixineed PHI-gaaga u siino qorshe kaloo caafimaad, daryeel caafimaad bixiye, ama hay'ad kale iyadoo la raacayo Xeerarka Asturnaanta ee federaalka. Hawlaha lacag-bixinta waxaa ku jiri kara ka fulinta qansheegashooyinka, go'aaminta u-qalmitaanka ama caymiska qansheegashooyinka, iyo dib u eegista adeegyada loogu baahan yahay caafimaadka.

- ***Hawlgallada Daryeelka Caafimaadka*** — Waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno oo aan shaacino PHI-gaaga si aan u fulino hawlgalladayada daryeelka caafimaadka. Hawlahan waxaa ka mid noqon kara bixinta adeegga macaamiisha, ka jawaabista cabashooyinka iyo rafcaannada, iyo bixinta maaraynta daryeelka iyo isku-duwidda daryeelka.

  Inta lagu gudajira hawlgalladayada daryeelka caafimaadka, waxaa laga yaabaa inaan PHI-ga siino shurakadayada ganacsiga. Waxaan shurakadan la yeelan doonaa heshiisyo qoraal ah si aan u ilaalino asturnaanta PHI-gaaga. Waxaa laga yaabaa in

aan PHI-gaaga siino hay'ad kale oo hoos timaada Xeerarka Asturnaanta ee federaalka. Hay'addu waa inay sidoo kale kula leedahay xiriir khuseeya hawlaheeda daryeelka caafimaadka. Tan waxa ku jira kuwa soo socda:

- Hawlaha qiimaynta tayada iyo horumarinta.
- Dib u eegista kartida ama shahaadooyinka xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka.
- Maareynta kiisaska ama dhacdooyinka iyo isku-duwida daryeelka.
- Ogaanshaha ama kahortagga khiyaanada iyo xadgudubka daryeelka caafimaadka.

Isirkaaga, qowmiyaddaada, luqaddaada, nooca galmada, iyo aqoonsiga jinsigaaga ayaa waxaa ilaaliya nidaamka iyo sharciyada qorshaha caafimaadka. Tani waxay ka dhigan tahay in macluumaadka aad bixiso uu yahay mid asturan oo sugan/ammaan ah. Waxaan kaliya macluumaadkan la wadaagi karnaa bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka. Lalama wadaagi doono dad kale iyadoon lagaa helin fasax ama ogolaansho. Waxaan u isticmaalnaa macluumaadkan inaan wanaajino tayada daryeelkaaga iyo adeegyadaada.
Macluumaadkani wuxuu naga caawinayaa inaan:

- Si fiican u fahanno baahiyahaaga daryeelka caafimaadka.
- Ogaano luqadda aad doorbideyso marka aad la kulmeyso bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka.
- Bixinta macluumaadka daryeelka caafimaadka si aan u daboolno baahiyahaaga daryeelka.
- Ku siinno barnaamijyo kaa caawinaya inaad yeelato caafimaadka ugu fiican.

Macluumaadkan looma isticmaalo ujeeddooyinka bixinta magdhowga ama gaarista go'aamada ku saabsan inaad awoodid inaad hesho caymis ama adeegyo iyo in kale.

- ***Shaacinta Qorshaha Caafimaadka Kooxda/Qorshaha Kafaala-qaadaha*** — Waxaa laga yaabaa in aan PHI-gaaga siino kafaala-qaadaha qorshaha caafimaadka kooxda, sida loo-shaqeeyaha ama cidda kaloo ku siiso barnaamij loogu talagalay daryeelka caafimaadka, haddii kafaala-qaaduhu ogolaado xaddidaadyo cayiman oo ku saabsan sida uu u isticmaali doona ama uu u shaacin doona macluumaadka caafimaad ee dhowrsan (sida oggolaanshaha in aan macluumaadka caafimaadka loo isticmaalin ficillada ama go'aamada la xiriira shaqaaleysiinta).

Shaacinada kale ee La Oggol yahay ama Loo Baahan yahay ee PHI-gaaga:

- ***Hawlaha Dhaqaale-ururinta*** — Waxaa laga yaabaa in aan PHI-gaaga u isticmaalno ama u shaacino hawlaha dhaqaale-ururinta, sida lacag u ururinta hay’ad samafal ah ama hay'ad la mid ah si looga caawiyo maalgelinta hawlahooda. Haddii aan kuula soo xiriirno hawlaha dhaqaale-ururinta, waxaan ku siin doonaa fursad aad kaga baxdo, ama aad ku joojiso helitaanka isgaarsiinta noocaas ah mustaqbalka.

- ***Ujeedooyinka Magdhowga*** — Waxaa laga yaabaa inaan PHI-gaaga u isticmaalno ama u shaacino ujeeddooyinka magdhowga, sida inaan go’aamino ka qaadashada codsi caymis ama codsi. Haddi aan PHI-gaaga u isticmaalno ama u shaacino

ujeeddooyinka magdhowga, waxaa naga mamnuuc ah inaan habka magdhowga ku isticmaalno ama ku shaacino PHI-gaaga uu kujira macluumaadka hidda-wadaha.

- ***Xusuusinta Ballanta/Daawaynta Beddelka ah*** — Waxaa laga yaabaa in aanu isticmaalno oo aanu shaacino PHI-gaaga si aanu kuu xasuusino ballamaha daawaynta iyo daryeelka caafimaadka ee aad nala leedahay ama si aan kuu siino macluumaad ku saabsan daawayn beddel ah ama faa'iidooyinka iyo adeegyada kale ee caafimaadka la xidhiidha, sida macluumaad ku saabsan sida loo joojiyo sigaarka ama loo dhimo miisaanka jireed.

- ***Sida Sharcigu u Baahan Yahay*** — Haddii sharciga federaalka, gobolka, iyo/ama sharciga deegaanka u baahan yahay isticmaalka ama shaacinta PHI-gaaga, waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno ama shaacino macluumaadkaaga PHI ilaa iyo xadka ay isticmaalka ama shaacinta ugu hoggaansamaan sharcigan waxaana tani xadidayo shuruudaha sharcigaas. Haddii laba sharci ama xeerar ama in ka badan oo maamula isticmaal ama shaacin isku mid ah ay is-khilaafaan, waxaanu u hogaansami doonaa sharciyada ama xeerarka leh xadidnaanta ugu badan.

- ***Hawlaha Caafimaadka Dadweynaha*** — Waxaa laga yaabaa inaan PHI-gaaga siino maamulka caafimaadka dadweynaha iyadoo ujeedadu tahay kahortagga ama xakamaynta cudurro, dhaawac, ama naafanimo. Waxaa laga yaabaa inaan PHI-gaaga siino Food and Drug Administration (FDA) si loo xaqiijiyo tayada, badqabka ama waxtarka badeecadaha ama adeegyada hoos yimaada xukunka FDA. Tan waxa ku jira diiwaanada SUD.

- ***Dhibanayaasha Xad-gudubka iyo Dayacaadda*** — Waxaa laga yaabaa inaan PHI-gaaga siino maamul degmo, maamul gobol, ama dawladda dhexe, oo ay ku jiraan adeegyada bulshada ama wakaalada adeegyada ilaalinta ee uu sharcigu u oggol yahay inay helaan warbixinnadaas haddii aan si macquul ah u aaminsannahay inay jiraan xadgudub, dayacaad ama rabshad guri.

- ***Dacwadaha Maxkamada iyo Maamulka*** — Waxaa laga yaabaa inaan shaacino PHI-gaaga inagoo ka jawaabeyno amar maamuleed ama maxkamad. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in nalooga baahdo inaan shaacino PHI-gaaga si aan uga jawaabno amar maxkamadeed, codsi ogaansho, ama codsiyo kaloo la mid ah.

- ***Fulinta Sharciga*** — Waxaa laga yaabaa inaan PHI-gaaga ku haboon siino sharci fulinta markii loo baahdo in sidaasi la sameeyo si looga jawaabo ficil dembi ah.

- ***Qaybta 2 (Diiwaanada Xaaladda Isticmaalka Maandooriyaha)*** — Haddii aanu helno ama ka hawlgalno diiwaanadaada Qaybta 2, isticmaali mayno diiwaanadan ama tusi mayno wixii dacwad madani, faldambiyeed, maamuleed, ama sharci ah ee kaa dhan ah haddii aysan amar ku bixin maxkamadi ama adigu qoraal ku fasaxin, iyo kadib ogaysiis, fursad lagugu dhagaysto adiga lagu siiyo.

- ***Baarayaasha, Baarayaasha Caafimaadka iyo Agaasimayaasha Aaska*** — Waxaa laga yaabaa inaan PHI-gaaga siino baare ama baaraha caafimaadka. Tani ayaa waxay noqon kartaa lagama maarmaan, tusaale ahaan, marka la go'aaminayo sababta dhimasho. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in aanu PHI-gaaga u shaacino agaasimayaasha aaska, markii loo baahdo, si ay u gutaan waajibaadkooda.

- ***Ku-deeqidda Xubnaha, Indhaha iyo Unugyada Jirka*** — Waxaa laga yaabaa in aan PHI-gaaga u shaacino hay'adaha soo iibinta xubnaha jirka. Waxaa sidoo kale laga yaabaa inaan PHI-gaaga u shaacino dad kale oo ka shaqeeya soo iibinta, kaydinta ama beerista xubnaha qof geeriyooday, indhaha, iyo unugyada jirka.

- ***Khatarta ku aadan Caafimaadka iyo Badbaadada*** — Waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno ama shaaca ka qaadno PHI-gaaga haddii aan si daacad ah u aaminsanahay, in isticmaalka ama shaacinta ay lagama maarmaan tahay si looga hortago ama loo yareeyo khatar halis ah oo wajaheyso caafimaadka ama badbaadada qof ama dadweynaha.

- ***Hawlaha Dawladda ee Qaaska ah*** — Haddii aad tahay xubin ka tirsan Ciidamada Qalabka Sida ee Maraykanka, waxaa laga yaabaa inaan shaaca ka qaadno PHI-gaaga markii ay ubaahdaan mas'uuliyiinta taliska militariga. Waxaa sidoo kale laga yaabaa inaan PHI-gaaga siino saraakiisha federaalka ee idman ee ku lug leh amniga qaranka, hawlaha sirdoonka, Waaxda Gobolka ee go'aaminta habboonaanta caafimaadka, ilaalinta Madaxweynaha, iyo dadka kale ee idman ee uu sharcigu dhigayo.

- ***Magdhawga Shaqaalaha*** — Waxaa laga yaabaa in aanu shaacino PHI-gaaga si aan ugu hoggaansano sharciyada la xidhiidha magdhiwga shaqaalaha ama barnaamijyada kale ee la midka ah ee uu sharcigu dejiyay ee bixiya faa'iidooyinka dhaawacyada ama jirooyinka la xiriira shaqada iyada oo aan la eegayn khaladka.

- ***Xaaladaha Gurmadka ah*** — Waxaa laga yaabaa in haddii ay jirta xaalad gurmad ah, ama haddii aad awood beesho ama aadan joogin, aan PHI-gaaga siino xubin qoyskaaga ah, saaxiib kuu dhow, wakaalada gargaarka musiibada ee idman, ama qof kastoo kale oo aad adiga hore u aqoonsatay. Waxaan isticmaali doonaa xukun xirfadeed iyo waayo-aragnimo si aan u go'aamino in shaacinta ay danta kuugu jirta iyo in kale. Haddi shaacinta aysan dani kuugu jirin, waxaanu kaliya shaaca ka qaadi doonaa PHI-ga si toos ah u khusaysa ku lug lahaanshaha qofka ee daryeelkaaga.

- ***Maxaabiista*** — Haddii aad tahay maxbuus ku jira machad asluub ama uu gacanta kugu haya sarkaal katirsan fulinta sharciga, waxaa laga yaabaa in aan PHI-gaaga siino machadka asluubta ama sarkaalka fulinta sharciga, haddii macluumaadkan uu lagama maarmaan u yahay in machadku ku siiyaan daryeel caafimaad; inay ilaaliyaan caafimaadkaaga ama badqabkaaga; ama caafimaadka ama badqabka dadka kale; ama badqabka iyo amniga machadka asluubta.

- ***Cilmi-baaris*** — Xaaladaha qaar, waxaa laga yaabaa inaan PHI-gaaga siino cilmi-baarayaasha marka daraasaddooda cilmi-baarista caafimaad la ansixiyo iyo markay jiraan ilaalinno gaar ah oo xaqiijinayo asturnaanta iyo sugnaanta PHI-gaaga.

Isticmaalka iyo Shaacinta PHI-gaaga ee u Baahan Oggolaanshahaaga oo Qoraal ah

Waxaa nalooga baahan yahay inaan helno oggolaanshahaaga oo qoraal ah si aan sababaha soo socda ugu isticmaalno ama ugu shaacino PHI-gaaga, marka laga reebo xadidaadyo kooban:

- ***Iibinta PHI*** — Waxaan codsan doonaa oggolaanshahaaga oo qoraal ah ka hor inta aanaan sameyn shaacin loo arki karo inay tahay iibinta PHI-gaaga, taasoo micnaheedu yahay in aanu magdhow helayno marka aan PHI-ga u shaacino qaabkan.

- ***Suuqgeyn*** — Waxaan codsan doonaa oggolaanshahaaga oo qoraal ah si aan PHI-gaaga ugu isticmaalno ama ugu shaacino ujeedooyin suuqgeyneed marka laga reebo xadidaadyo kooban, sida marka aan kula leenahay wada-hadal suuqgeyn oo fool-ka-fool ah ama marka aan ku siinno hadiyado xayaysiis ah oo qiimahoodu la sheegay.

- ***Qoraallada Daawaynta Xanuunada Maskaxda*** — Waxaan codsan doonaa oggolaanshahaaga oo qoraal ah si aan u isticmaalno ama u shaacino mid ka mid ah qoraalladaada daaweynta xanuunada maskaxda ee laga yaabo in aan ku hayno faylka marka laga reebo xadidaadyo kooban, sida marka loo adeegsanayo daaweynta qaar, lacag-bixin ama hawlgalada daryeelka caafimaadka.

Waxaad xaq u leedahay inaad ka noqoto oggolaanshahaaga adigoo adeegsanayo qoraal wakhtigii aad doonto marka laga reebo ilaa iyo xad aan horay u isticmaalnay ama aan u shaacinay PHI-gaaga inagoo adeesaneyno oggolaanshahaas hore.

Xuquuqda Shakhsiyaadka

Kuwa soo socda ayaa ah xuquuqahaaga khuseeya PHI-gaaga. Haddii aad jeclaan lahayd inaad isticmaasho mid ka mid ah xuquuqaha soo socda, fadlan nala soo xiriir adoo isticmaalaya macluumaadka ku qoran dhamaadka Ogeysiiskan.

- ***Xaqa lagu Codsanayo Xayiraadaha*** — Waxaad xaq u leedahay inaad codsato xayiraadyo ku aadan marka PHI-gaaga loo isticmaalayo loona shaacinayo daawaynta, lacag-bixinta, ama hawlaha daryeelka caafimaadka, iyo sidoo kale marka loo shaacinayo dadka ku lugta leh daryeelkaaga ama bixinta lacagta daryeelkaaga, sida xubnaha qoyska ama saaxiibaha kuu dhow. Codsigaagu waa inuu sheegaa xayiraadyada aad codsanayso iyo cidda ay xayiraada khusayso. Khasab naguma aha inaan oggolaano codsigan. Haddi aan oggolaano, waan u hogaansami doonaa codsigaaga xayiraada in macluumaadka loo baahan yahay si laguu siiyo daawayn loogu talagalay xaalad gurmad ah mooyee. Si kastaba ha ahaatee, waxaan xayiri doonaa isticmaalka ama shaacinta PHI-ga ee loogu talagalay lacag-bixinta ama hawlgallada daryeelka caafimaadka ee ku aadan qorshe caafimaad marka aad lacagta adeega ama shayga si buuxda uga bixiso jeebkaaga.

- ***Xaqa lagu Codsanayo Wada-xiriir Qarsoodi ah*** — Waxaad xaq u leedahay in aad codsato in marka aan kuula soo xiriireyno wax ku saabsan PHI-gaaga aan kuula soo xiriirno siyaabo kale ama aan kaala soo xiriirno meelo kale. Xaqqani ayaa khuseeyaa keliya haddii macluumaadka uu khatar kugu keeni karo haddii aan lagugu soo gudbin

habka beddelka ah ama goobta beddelka ah ee aad rabto. Uma baahnid inaad sharaxdo sababta codsigaaga, laakiin waa inaad sheegtaa in macluumaadka uu khatar ku gelin karo haddii habka ama goobta wada-xririirka aan la bedelin. Waa in aan la kulannaa codsigaaga haddii uu macquul yahay oo uu qeexayo habka ama goobta beddelka ah ee ay tahay in lagugu soo diro PHI-ga.

- ***Xaqa lagu Gelayo oo lagu Helayo Nuqulka PHI-gaaga*** — Waxaad xaq u leedahay, marka laga reebo xadidaadyo kooban, in aad eegto ama aad hesho nuqulada PHI-gaaga ee ku jira diiwaanka la qoondeeyay. Waxaad codsan kartaa in aan nuqullada kugu siinno qaab aan ahayn koobiyada warqadaha ah. Waxaan isticmaali doonaa qaabka aad codsato in aysan macquul ahayn inaan awoodno mooyee**.** Waa in aad soo gudbisaa codsi qoraal ah si aad u hesho PHI-gaaga. Haddii aan diidno codsigaaga, waxaan kugu siin doonaa sharraxaad qoraal ah waxaana kuu sheegi doonaa in sababaha diidmada dib loo eegi karo iyo in kale. Waxaan sidoo kale kuu sheegi doonaa sida loo codsado dib u eegistaas ama waxaan kuu sheegi doonaa haddii diidmada aan dib loo eegi karin.

- ***Xaqa aad u leedahay inaad Wax ka bedesho PHI-gaaga*** — Waxaad xaq u leedahay in aad codsato in aanu wax ka bedelno, ama bedelno PHI-gaaga haddii aad aaminsantahay in uu ku jiro macluumaad khaldan. Codsigaagu waa inuu ahaadaa qoraal, waana inuu sharaxaa sababta macluumaadka loo bedelayo. Waxaa laga yaabaa inaan diidno codsigaaga sababo gaar ah awgood, tusaale ahaan haddii aanaan inagu abuurin macluumaadka aad rabto in wax laga beddelo oo cidda abuurtay PHI-ga ay awoodo inay sameeyso beddelka. Haddii aan diidno codsigaaga, waxaan ku siin doonaa sharraxaad qoraal ah. Waxaad ku soo jawaabi kartaa bayaan sheegayo inaadan ku qanacsaneyn go'aankayaga waxaananu bayaankaaga ku lifaaqi doonaa PHI-ga aad codsatay inaan wax ka bedelno. Haddii aan aqbalno codsigaaga ah in aan wax ka beddelno macluumaadka, waxaan sameyn doonaa dadaallo macquul ah si aan dadka kale, oo ay ku jiraan dadka aad magacawday, u ogeysiino wax ka beddelka iyo si aan isbeddellada ugu darno shaacinada mustaqbalka ah ee macluumaadkaas.

- ***Xaqa lagu Helayo Xisaabinta Shaacinta*** — Waxaad xaq u leedahay in aad hesho liiska dhacdooyinka 6-dii sano ee la soo dhaafay ee aan inaga ama shurakadayada ganacsi shaacinay PHI-gaaga. Tani ma khusayso shaacinada loogu talagalay ujeedooyinka daawaynta, lacag-bixinta, hawlgallada daryeelka caafimaadka, ama shaacinada aad ogolaatay iyo hawlo kaloo gaar ah. Haddii aad codsato xisaabaadkan in ka badan hal mar muddo 12 bilood ah, waxaan kugu soo dallici karnaa khidmad macquul ah oo loogu talagalay ka jawaabista codsiyadan dheeraadka ah. Waxaan ku siin doonaa macluumaad dheeri ah oo ku saabsan khidmadahayaga wakhtiga codsigaaga.

- ***Xaqa soo Gudbinta Cabasho*** — Haddii aad dareemeyso in xuquuqdaada asturnaanta lagu xadgudbay ama aanu ku xadgudubnay habdhaqamadayada asturnaanta, waxaad cabasho noogu soo gudbin kartaa qoraal ama telefoon adoo isticmaalaya macluumaadka xiriirka ee ku qoran dhamaadka Ogeysiiskan.

  Waxaad sidoo kale cabasho u gudbin kartaa Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah ee Xoghayaha Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka adiga oo warqad u diraya 200 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20201 ama

wacayo **1-800-368-1019 (TTY: 1-800-537-7697)** ama booqanayo **hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/complaints**/.

KAAGAMA QAADI DOONO WAX TALLAABO AH OO LAGAAGA AARGOOSANAYO GUDBINTA CABASHADA.

- ***Xaqa lagu Helayo Nuqulka Ogeysiiskan*** — Waxaad codsan kartaa nuqulka Ogeysiiska wakhti kasta adoo isticmaalaya macluumaadka xiriirka ee ku qoran dhamaadka Ogeysiiska. Haddii aad Ogaysiiskan ka hesho mareegtayada ama aad ku hesho iimayl (email), waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad codsato nuqulka Ogeysiiska oo warqad ah.

Macluumaadka Xiriirka & Su'aalaha ku saabsan Ogaysiiskan: Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan ogeysiiskan, habdhaqamadayada asturnaanta ee la xidhiidha PHI-gaaga, ama sida loo isticmaalo xuquuqdaada waxaad nagula soo xiriiri kartaa qoraal ama taleefan adoo isticmaalaya macluumaadka xiriirka ee hoos ku qoran.

Wellcare
Attn: Privacy Official
Wellcare Health Plans Inc.
P.O. Box 31378
Tampa, FL 33631
Fax: ***1-866-473-9124***

Notice of Availability of Language Assistance Services and Auxiliary Aids and Services

ATTENTION: If you speak a language other than English, free language assistance services are available to you. Appropriate auxiliary aids and services to provide information in accessible formats are also available free of charge. Call 1-877-374-4056 (TTY: 711).

አማርኛ ይነበብ፦ ነጻ የቋንቋ እገዛ አገልግሎቶች ለእርስዎ ይገኛሉ። በተጨማሪም አግባብነት ያላቸው ለእርስዎ ተደራሽ በሆኑ ቅርጸቶች መረጃ የሚያቀርቡልዎ አጋዥ መሳሪያዎች እና አገልግሎቶችን ከክፍያ ነጻ ያገኛሉ። ወደ 1-877-374-4056 (TTY: 711) ይደውሉ።

العربية انتباه: تتوفر لك خدمات مساعدة لغوية مجانية. تتوفر كذلك مجانًا مساعِدات وخدمات إضافية ملائمة لتزويد المعلومات بتنسيقات قابلة للوصول إليها. اتصل على الرقم 1-877-374-4056 (TTY: 711).

Հայերեն ՈՒՇԱԴՐՈՒԹՅՈՒՆ. Դուք կարող եք օգտվել անվճար լեզվական ծառայություններից: Անվճար հասանելի են նաև համապատասխան օժանդակ միջոցներ և ծառայություններ՝ մատչելի ձևաչափերով տեղեկություններ տրամադրելու համար: Զանգահարեք 1-877-374-4056 (TTY՝ 711):

বাংলা খেয়াল করুন: আপনার জন্য বিনামূল্যে ভাষা পরিষেবার সুবিধা রয়েছে। বিনামূল্যে অ্যাক্সেসযোগ্য ফর্ম্যাটে তথ্য দিতে উপযুক্ত সহায়ক উপকরণ এবং পরিষেবাও উপলব্ধ রয়েছে। এখানে কল করুন 1-877-374-4056 (TTY: 711)।

Français cadien COMMUNIQUE: Des services d’aide linguistique sans frais sont à votre disposition. Des aides et services auxiliaires appropriés pour fournir des informations en formats accessibles sont également proposés sans frais. Composez le 1-877-374-4056 (TTY : 711).

ភាសាខ្មែរ ចូរចាប់អារម្មណ៍៖ សេវាជំនួយភាសាដោយឥតគិតថ្លៃមានសម្រាប់អ្នក។ ជំនួយនិងសេវាជំនួយសមស្របដើម្បីផ្តល់ជូនព័ត៌មានជាទម្រង់ដែលអាចប្រើបាន ក៏មានដោយមិនគិតថ្លៃផងដែរ។ សូមទូរសព្ទទៅលេខ 1-877-374-4056 (TTY: 711)**។**

简体中文 注意：我们为您提供免费的语言协助服务，同时也可免费提供适当的辅助设施与服务，以便提供无障碍格式的信息。请致电 1-877-374-4056（TTY：711）。

繁體中文 注意：我們爲您提供免費的語言協助服務，還免費提供適當的輔助工具和服務，以無障礙格式提供資訊。請致電 1-877-374-4056 (TTY：711)。

دری توجه: خدمات رایگان کمک زبانی برای شما فراهم است. وسایل و خدمات کمکی مناسب برای ارائه اطلاعات به شکل قابل دسترس نیز به طور رایگان در دسترس می‌باشند. لطفاً با شماره 1-877-374-4056 (TTY: 711) تماس بگیرید.

فارسی توجه: خدمات کمک زبانی رایگان برای شما دردسترس است. ابزارها و خدمات کمکی مناسب برای ارائه اطلاعات در قالب‌های قابل‌دسترس نیز به‌صورت رایگان ارائه می‌شوند. لطفاً با شماره 1-877-374-4056 (TTY: 711) تماس بگیرید.

Français REMARQUE : des services d’assistance linguistique gratuits sont à votre disposition. Des services et aides pour obtenir des informations dans des formats accessibles sont également disponibles gratuitement. Appelez le 1-877-374-4056 (TTY : 711).

Y0020_WCM_4336850_MLT_NAMA_C Internal Approved 06162025 NA LWc
4590652_NA6WCMINSMLT_M_NAWC 06/25

Deutsch ACHTUNG: Sprachdienstleistungen stehen Ihnen kostenlos zur Verfügung. Geeignete zusätzliche Unterstützung und Dienstleistungen für Informationen in zugänglichen Formaten stehen Ihnen ebenfalls kostenlos zur Verfügung. Rufen Sie folgende Nummer an: 1-877-374-4056 (TTY: 711).

Ελληνικά ΠΡΟΣΟΧΗ: Εάν μιλάτε ελληνικά, υπάρχουν διαθέσιμες δωρεάν υπηρεσίες υποστήριξης στη συγκεκριμένη γλώσσα. Διατίθενται επίσης δωρεάν κατάλληλα βοηθήματα και υπηρεσίες για παροχή πληροφοριών σε προσβάσιμες μορφές. Καλέστε το 1-877-374-4056 (TTY: 711).

ગુજરાતી ધ્યાન આપવાની જરૂર છે: તમારા માટે ભાષા સંબંધી સહાયતાની મફત સેવાઓ ઉપલબ્ધ છે. ઍક્સેસ કરી શકાય તેવાં ફોર્મેટમાં માહિતી પરૂદાન કરવા માટે યોગ્ય સહાયક સહાય અને સેવાઓ પણ મફતમાં ઉપલબ્ધ છે. 1-877-374-4056 (TTY: 711) પર કૉલ કરો.

Kreyòl Ayisyen ATANSYON: Sèvis èd gratis pou lang disponib pou ou. Aparèy oksilyè ki bay asistans ak sèvis ki apwopriye pou bay enfòmasyon nan fòma aksesib yo disponib gratis tou. Rele nan 1-877-374-4056 (TTY: 711).

ʻŌlelo Hawaiʻi HOʻĀKAKA: Loaʻa iā ʻoe ke kōkua manuahi no ka unuhi ʻōlelo. Loaʻa pū kekahi mau pono kōkua kūpono a me nā lawelawe e hāʻawi ai i ka ʻike i nā ʻano ʻano hiki ke kiʻi ʻia, me ka uku ʻole. Kelepona i 1-877-374-4056 (TTY: 711).

हिंदी ध्यान दें: आपके लिए निःशुल्क भाषा सहायता सेवाएं उपलब्ध हैं. एक्सेस करने योग्य फ़ॉर्मेट में जानकारी प्रदान करने के लिए उपयुक्त सहायक साधन और सेवाएं भी निःशुल्क उपलब्ध हैं. 1-877-374-4056 (TTY: 711) पर कॉल करें.

Igbo NLERUANYA: A na-enye gị ọrụ enyemaka asụsụ n’efu. Enyemaka na ọrụ ndị kwesịrị ekwesị iji nye ozi n’ụdị ndị dị mfe inweta dikrawa n’akwụghị ụgwọ. Kpọọ 1-877-374-4056 (TTY: 711).

Iloko PALIIWEN: Adda dagiti libre a serbisio a tulong iti pagsasao. Dagiti maitutop a katulongan ken serbisio a mangipaay iti impormasion kadagiti nalaka a maawatan a pormat ket libre met a magun-odan. Tawagan ti 1-877-374-4056 (TTY: 711).

Italiano ATTENZIONE: sono disponibili servizi di assistenza linguistica gratuiti. Sono inoltre disponibili supporti e servizi ausiliari gratuiti adatti a fornire le informazioni in formati accessibili. Chiamare il numero 1-877-374-4056 (TTY: 711).

日本語 注意：言語支援サービスを無料で提供しています。情報をアクセシビリティに対応した形式で提供する各種補助支援およびサービスも無料です。1-877-374-4056 (TTY: 711) にお電話ください。

ಕನ್ನಡ ನಿಮ್ಮ ಗಮನಕ್ಕೆ: ನಿಮಗೆ ಉಚಿತ ಭಾಷಾ ಸಹಾಯ ಸೇವೆಗಳು ಲಭ್ಯವಿದೆ. ಪ್ರವೇಶಿಸಬಹುದಾದ ಸ್ವರೂಪಗಳಲ್ಲಿಮಾಹಿತಿಯನ್ನುಒದಗಿಸಲು ಸೂಕ್ತವಾದ ಸಹಾಯಕ ಸಾಧನಗಳು ಮತ್ತುಸೇವೆಗಳು ಸಹ ಉಚಿತವಾಗಿ ಲಭ್ಯವಿದೆ. ಕರೆ ಮಾಡಿ 1-877-374-4056 (TTY: 711).

한국어 주의: 무료 언어 지원 서비스를 이용하실 수 있습니다. 정보 제공을 위해 적합한 보조 도구 및 서비스 또한 액세스 가능한 형식으로 무료 이용이 가능합니다. 1-877-374-4056 (TTY: 711)번으로 전화해 주십시오.

ພາສາລາວ ໝາຍເຫດ: ມີບໍລິການຊ່ວຍເຫຼືອດ້ານພາສາຟຣີສຳລັບທ່ານ ນອກຈາກນີ້ຍັງມີບໍລິການຊ່ວຍເຫຼືອ ແລະ ບໍລິການ ເສີມທີ່ເໝາະສົມເພື່ອໃຫ້ຂໍ້ມູນທີ່ສາມາດເຂົ້າເຖິງໄດ້ໂດຍບໍ່ຕ້ອງເສຍຄ່າໃຊ້ຈ່າຍເພີ່ມເຕີມ. ໂທ 1-877-374-4056 (TTY: 711).

മലയാളം ശ്രദ്ധിക്കൂ: നിങ്ങൾക്ക് സൗജന്യ ഭാഷാ സഹായ സേവനങ്ങൾ ലഭ്യമാണ്. ആക്സസ് ചെയ്യാവുന്ന ഫോർമാറ്റുകളിൽ വിവരങ്ങൾ നൽകുന്നതിന്, സൗജന്യമായി അനുയോജ്യമായ ഓക്സിലിയറി സഹായങ്ങളും സേവനങ്ങളും ലഭ്യമാണ്. 1-877-374-4056 (TTY: 711) എന്ന നമ്പറിൽ വിളിക്കുക.

तुमच्यासाठी विनामूल्य भाषा सहाय्य सेवा उपलब्ध आहेत. सुलभ स्वरूपात माहिती प्रदान करण्यासाठी योग्य अतिरिक्त मदत आणि सेवादेखील विनामूल्य उपलब्ध आहेत. 1-877-374-4056 (TTY: 711) वर कॉल करा.

Diné Bizaad BAA NAANISH'AGHA: T'aadoo baabhilinigoo saad 'ahiilka 'ana'alwo' biniit'aa bineesh'a bil hadlee' goo ni. Ch'idi'nishaah t'aala'i bi'aa yilts'ilgo bika 'iishyeed 'aadoo biniit'aa goo bik'inaasdzil bil ch'idaash'a di baa honit'I' ya'akogoo bineesh'a aldo' bil hadlee' t'aadoo baabhilinigoo 'at'e yeel. Bika 'adishni 1-877-374-4056 (TTY: 711).

नेपाली ध्यान दिनुहोस्: तपाईंका लागि भाषासम्बन्धी सहायता सेवाहरू निःशुल्क रूपमा उपलब्ध छन्। सुलभ फर्म्याटहरूमा जानकारी प्रदान गर्नका निम्ति उचित सहायक सामग्री र सेवाहरू पनि निःशुल्क रूपमा उपलब्ध छन्। 1-877-374-4056 (TTY: 711) मा कल गर्नुहोस्।

Pennsylvania Deitsch GEB ACHT: Schprooch Helfe sin meeglich mitaus Koscht. Rechtliche Auxiliary Aids un Helfe um Information zu gewwe in helfreiche Formats sin aa meeglich mit aus Koscht. Ruf 1-877-374-4056 (TTY: 711).

Polski UWAGA: usługi wsparcia językowego są dostępne nieodpłatnie. Bezpłatnie oferowane są również dodatkowe pomoce i usługi pozwalające na przekazanie informacji w formacie przystępnym dla odbiorcy. Zadzwoń pod numer 1-877-374-4056 (TTY: 711).

Português ATENÇÃO: estão disponíveis serviços de assistência gratuitos no seu idioma. Também estão disponíveis apoios auxiliares e serviços adequados que oferecem informações em formatos acessíveis e sem custos. Ligue para 1-877-374-4056 (TTY: 711).

ਮੁਫ਼ਤ ਭਾਸ਼ਾ ਸਹਾਇਤਾ ਸੇਵਾਵਾਂ ਤੁਹਾਡੇ ਲਈ ਉਪਲਬਧ ਹਨ। ਪਹੁੰਚਣਯੋਗ ਫਾਰਮੈਟਾਂ ਵਿੱਚ ਜਾਣਕਾਰੀ ਪਰ੍ਦਾਨ ਕਰਨ ਲਈ ਢੁਕਵੇਂ ਸਹਾਇਕ ਸਾਧਨ ਅਤੇ ਸੇਵਾਵਾਂ ਵੀ ਮੁਫ਼ਤ ਵਿੱਚ ਉਪਲਬਧ ਹਨ। 1-877-374-4056 (TTY: 711) 'ਤੇ ਕਾਲ ਕਰੋ।

Русский ВНИМАНИЕ! Вам доступны бесплатные услуги языковой поддержки. Вы также можете бесплатно получить соответствующие вспомогательные средства и услуги, направленные на предоставление информации в доступных форматах. Позвоните по номеру 1-877-374-4056 (TTY: 711).

Gagana Sāmoa FA'AALIGA: O lo'o avanoa fua ia te oe auaunaga fesoasoani i le gagana. E avanoa fo'i fua fesoasoani ma meafaigaluega talafeagai e tu'uina atu ai fa'amatalaga i auala faigofie ona malamalama ai. Vala'au 1-877-374-4056 (TTY: 711).

Srpski PAŽNJA: Dostupne su vam besplatne usluge jezičke pomoći. Odgovarajuća pomagala i pomoćne usluge koje nude informacije o pristupačnim formatima takođe su besplatne. Pozovite broj 1-877-374-4056 (TTY: 711).

Soomaali DIGNIIN: Adeegyada kaalmada luqadda bilaashka ah ayaa kuu diyaar ah. Sidoo kale, qalab iyo adeegyo kaabayaal ku habboon ayaa diyaar ah si macluumaadka loogu helo qaabab sahlan oo la heli karo, iyadoo aan wax kharash ah lagaaga qaadin. Wac 1-877-374-4056 (TTY: 711).

Español ATENCIÓN: Contamos con servicios de asistencia lingüística que se encuentran disponibles para usted de manera gratuita. También se encuentran disponibles de manera gratuita ayudas y servicios auxiliares adecuados para proporcionar información en formatos accesibles. Llame al 1-877-374-4056 (TTY: 711).

Kiswahili TANBIHI: Huduma za usaidizi wa lugha zinapatikana bila malipo kwako. Nyenzo na huduma sahihi za usaidizi za kutoa maelezo katika miundo inayoweza kufikiwa pia zinapatikana bila malipo. Piga simu 1-877-374-4056 (TTY: 711).

Tagalog ATENSYON: May mga libreng serbisyo ng tulong sa wika na available para sa inyo. Available din nang libre ang mga naaangkop na karagdagang tulong at serbisyo para makapagbigay ng impormasyon sa mga accessible na format. Tumawag sa 1-877-374-4056 (TTY: 711).

தமிழ் உங்களின் கவனத்திற்கு: உங்களுக்கு மொழி உதவிக்கான இலவச சேவைகள் கிடைக்கின்றன. பயன்படுத்தக்கூடிய வடிவங்களில் தகவல்களை வழங்குவதற்குப் பொருத்தமான புலன் உணர்வுக் கருவிகளும் சேவைகளும் இலவசமாகக் கிடைக்கின்றன. 1-877-374-4056 (TTY: 711) **என்ற எண்ணை அழைத்திடுங்கள்**.

తెలుగు గమనిక: మీకు ఉచిత భాష సంబంధ సహాయక సేవలు అందుబాటులో ఉనాన్యి. యాకెస్స్ చేయదగిన ఫారామ్ట్లలో సమాచారానిన్ అందించడానికి తగిన సహాయక టూల్లు, సేవలు కూడా ఉచితంగా అందుబాటులో ఉనాన్యి. 1-877-374-4056 (TTY: 711) **నంబర్కి కాల్ చేయండి**.

ไทย โปรดทราบ: พร้อมให้บริการความช่วยเหลือทางภาษาฟรีแก่คุณ และมีความช่วยเหลือและบริการเสริมที่เหมาะสมเพื่อให้ข้อมูลในรูปแบบที่เข้าถึงได้โดยไม่มีค่าใช้จ่ายด้วยเช่นกัน โทร 1-877-374-4056 (TTY: 711)

Twi HYƐ NO NSO: Kasa ho mmoa dwumadie ahodoɔ wɔ hɔ ma wo a wontua hwee. Nneɛma a ɛbɛboa wo ama wate nsɛm ne dwumadie ahodoɔ a ɛde nsɛm bɛma wo wɔ akwan bebree so nso wɔ hɔ a wontua hwee. Frɛ 1-877-374-4056 (TTY: 711).

Українська УВАГА! Вам доступні безкоштовні послуги мовної допомоги. Відповідні допоміжні засоби та послуги для надання інформації у доступних форматах також доступні безкоштовно. Зателефонуйте за номером 1-877-374-4056 (TTY: 711).

اردو توجہ: زبان معاونت کی خدمات آپ کے لیے مفت دستیاب ہیں۔ معلومات کو قابلِ رسائی شکل میں فراہم کرنے کے لیے مناسب معاون امداد اور خدمات بھی مفت دستیاب ہیں۔ 1-877-374-4056 (TTY: 711) پر کال کریں۔

Tiếng Việt LƯU Ý: Chúng tôi có cung cấp dịch vụ hỗ trợ ngôn ngữ miễn phí. Các dịch vụ và trợ giúp bổ trợ phù hợp để cung cấp thông tin ở các đĭnh dạng có thể truy cập cũng được cung cấp miễn phí. Gọi 1-877-374-4056 (TTY: 711).

ייִדיש אויפֿמערקזאַמקייט: פרייע שפּראַך הילף סערוויסעס זענען פֿאַר אײַך פֿאַראַן. פּאַסיקע הילפסמיטלען און סערוויסעס צו צושטעלן אינפֿאָרמאַציע אין צוגענגלעכע פֿאָרמאַטן זענען אויך פֿאַראַן פריי פֿון אָפּצאָל.
רופֿט 1-877-374-4056 (TTY: 711).

Yorùbá ÀKÍYÈSÍ: Àwọn iṣẹ́ ìránlọ́wọ́ ti èdè wà nílẹ̀ fún ọ lọ́fẹ̀ẹ́. Àwọn iṣẹ́ àti àwọn ìrànwọ́ aranníl̀ọ́wọ́ tóyẹ láti pèsè ìwífúnni ní àwọn ọ̀nà kíkọsílẹ̀ tóṣeé ráàyè sí tún wà nílẹ̀ bákan náà lọ́fẹ̀ẹ́ láisan owó rárá. Pe 1-877-374-4056 (TTY: 711).